# Shaqada

Furaha Suuqa Shaqada
Shaqo helitaan
Xuquuqda iyo Waajibaadka
Shaqo la'aanta
Aqoonsiga Shahaadada

# Furaha Suuqa Shaqada

Waxay ku xirantahay wadanka aad kasoo jeedo ama sababta aad u timid wadankan Swiiserlaan, inaad halkan ka shaqeeysan karto ama aad Ganacsi ka furan karto. Si kastaba ha noqotee waa in Shaqaale walbo uu ka diiwangishan yahay Ceymiska Bulshada bixiyana Canshuuraha.

## Ogolaanshaha Shaqada

Su'aalaha ku saabsan ogolaanshaha shaqada waxaa wada jir loogu bayaaniyaa qaadashada Ogolaanshaha Dalku Jooga. Sida caadiga ah dadka haysto ogolaansho ay ku joogaan Wadanka Swiiserlaan, wey shaqeysan karaan. Hadba wadanka aad ka soo jeedid iyo muddada shaqada aad haysato ayaad ku dalbanaysaa Ogolaanshiyaha. Hadii aadan hubin waxaa kaa caawin doono xarumaha aan xusi doono. Xarumahan waxay wacyigeliyaan sidoo kale dadka dibadda ku nool ee doonaya inay ka shaqaystaan Swiiserlaan. Dadka sida rasmiga ah loo siiyay magangelyada Qaxootinimada (Sharciga B) amaba dadka sida kumeel gaarka ah loo siiyay magangelyada Qaxootinimada ama Bini'aadanimada ee haysta (Sharciga F) uma baahna ogolaansho shaqo oo gaar ah. Laakin shaqo kasto oo ay helaan ama kasoo tagaan waa inay foom rasmi ah kula socodsiiyaan Gobolka ay ku taalo goobtooda shaqada (Meldeverfahren). Buuxinta Foomka noocan ah waa bilaash. Magangelyo doonka aan wali la qaabilin ee haysta (Sharciga N) waxay u baahanyihiin ogolaansho ay ku shaqaystaan.

## Shirkad ku gaar ah

In aad furan karto goob ganacsi oo kuu gaar ah waxey ku xirantahay wadanka aad kasoo jeedo iyo Nooca Sharciga aad wadanka ku joogto. Daka kasoo jeedo wadamada Yurub EU/EFTA iyo dadka haysto Sharciga Dalku Jooga C, sahal ayay u tahay inay furtaan goob ganacsi. Ha'adda Socdaalka (Migrationsamt) ayaa macluumaadyo kusiinayso, hadii furashada goob ganacsi ay tahay macquul iyo inkale. Laanta horumarinta goobaha (Standortförderung) waxay kaa caawinaysaa qaabkii aad howshaas u bilaabi lahayd.

## Shaqooyinka Suuqa Madoow

Qof shaqeeya oo aan kadiiwaangishaneyn Ceymisyada Bulshada, aanan heysan ogolaanshaha shaqada ama aan dakhliga soo galo wax Canshuur ah kadhiibin, waa dambiile. Qaabkan Suuqa madoow (Schwarzarbeit) waxay cawaaqib xumo sharci ah ku yeelanaysaa , qofka loogu shaqeeyo ama ka shaqeeysto. Sidoo kale dadka ka shaqeeyo shaqooyinka noocan ah kuma jiraan Ceymiska Shilalka mana helayaan keydka Howlgabka. Qofkii aaminsan in qofka uu u shaqeeyo si sax ah u shaqaaleysiin, waxaa habboon inuu la xiriiro Xarumaha Garyaqaanada (Rechtsberatungsstelle) ee bilaashka ah.

## Dhalinyarada

Caadiyan waaloo ogolyahay inay shaqeeyaan da'yarta ka weeyn 15 sano. Laakin Shaqooyin fudud oo dhib yar sida shaqooyinka fasaxyada (Ferienjobs) ayaa loo ogolyahay. Waalidka iyo Qofka loo shaqeynaayo waa inay ka fiirsadaan in da'yarta aan culeeys la saarin. Da'yarta ka yar 18 sano waxaa jiro xeerar shaqo oo gaar ah oo lagu dhaqmo.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/arbeit/zugang-arbeitsmarkt

# Shaqo helitaan

Marka loo fiiriyo wadamada kale, Swiiserlaan dadka shaqo la'aanta ah waa kuwo yar. Hase yeeshee shuruudaha laga rabo dadka shaqo doonka ah waa kuwo badan. Shahaadooyinka waxey xambaarsanyihiin macno weyn. Inta ugu badan shaqooyinka shuruudaha ugu muhiimsan waa fahanka luqadda Jarmalka.

## Heerka Aqoonta

Heerarka waxbarashada, shahaadooyinka iyo aqoon kororsiga ayaa Swiiserlaan shaqooyinka ugu badan lagu qiimeeyaa. Shahaadooyinka Dibada ma ahan kuwo marwaliba la aqoonsanyahay. Waxa aadka ugu muhiimsan shaqo raadinta waa Warbixinada ay kaa qoreen meelihii aad horay uga soo shaqeysay. Shaqooyinka badanaa waxaa la iska rabaa Fahanka Luqadda Jarmalka.

## Helitaanka goob shaqo

Shaqooyinka bannaan waxaa laga helaa wargeysyada iyo boggag kala duwan oo internetka ah. Sidoo kale waxaa jiro Xafiisyo u gaar ah shaqooyinka. Xarumaha Gobolka ee Shaqada (RAV) waxay kaa caawin karaan shaqo raadinta. Waxaa yaalo goobahaas Kambuyuutaro iyo Wargeysyo, shaqaalaha goobtaasna waxay kaala talinayaan shaqo raadinta.

## Codsiga Shaqada

Sida caadiga ah Shaqada waxaa lagu dalbada si qoraal ah, I-Meeyl ahaan ama onlineka. Codsiyada shaqada waa inay ka koobnaadaan ugu yaraan CV, warqadda Codsiga iyo hadii ay macquul tahay shahaadooyinka shaqada, ama waxbarashada. Hadii qofka aad codsiga shaqada u dirsatay daneynaayo codsigaada, waxuu kugu casuumi wareeysiga shaqada. Xafiisyo kala duwan ayaa si bilaash ah uga caawiyo dadka shaqo raadiska ah dalabka shaqooyinka.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/arbeit/arbeit-finden

# Xuquuqda iyo Waajibaadka

Shaqaalaha iyo kan loo shaqaynayaba waxey leeyihiin xuquuq iyo waajibaad. Sida sharciga ku xusan waxaa kamid ah, Xiliyada shaqada, Xaqa fasaxyada aad u leedahay iyo Ceymisyada.

## Qandaraaska Shaqada

Sida caadiga ah Qandaraasyada shaqada waxaa lagu kala sixiixdaa qaab qoraal ah. Laakin sidoo kale qandaraasyada afka lagu galo waa dhaqan galayaan. Xeerarka (Obligationenrecht) ayay ku xusanyihiin. Waxaa kuxusan halkaas waxyaabaha aasaasiga ah oo dhan. Sidoo kale dadka aanan haysan qandaraas qoraal ah waxay leeyihiin Xuquuq iyo waajibaadyo kala duwan.

## Xaquuqda Shaqaalaha

Shaqaalaha wadanka Swiiserlaan waxey leeyihiin Xuquqo dharci ah oo kala duwan. Waxaa ugu muhiimsan kuwan hoos ku xusan:

- Qofka loo shaqeynaayo waxaa waajib kasaaran inuu u diiwaangeliyo shaqaalihiisa Ceymiska Bulshada, oo u xareeyo Ceymiska Shilalka qeyb ka mid ah qarashaadka ceymisyadaasna uu ka bixiyo.
- Dhammaan shaqaalaha waxey leeyihiin ugu yaraan sanadkiiba 4 usbuuc fasax ah oo lacagtooda usoconayso. Sidoo kale Xuquuqdan waxaa leh shaqaalaha ku shaqeeyo saacadaha ama halgelin shaqeeyo.
- Saacadaha ugu badan ee la ogolyahay in la shaqeeyo usbuucii waa 50 saacadood. Shaqooyinka qaarna waa 45 saacadood kaliya.
- Shaqaalaha waxay xaq u leeyihiin Shahaadada shaqada oo qoraal ah.
- Qofkii xanuunsado ama shil galo oo wax ka badan 3 bilood ka shaqeynaayay shirkada, waxuu xaq u leeyihiin muddo cayimman in mushaharkiisa usii socdo.
- Haweenka Uurka leh iyo Haweenka umusha ah waxay leeyihiin xuquuq gaar ah (Daryeelka Hooyada, Mutterschutz).
- Sharciga sinaanshaha jinsiga (Gleichstellungsgesetz) wuxuu mamnuucayaa in shaqada dhexdeeda aan qofna nooca jinsigiisa lagu liidin.

## Mushaharka

Gobolka Basel-Stadt waxaa jiro mushahar ay sharci tahay inaan wax ka hooseyo la bixin karin. Waxaa xaq u leh Mushaharkan dhamaan shaqaalaha Gobolka marka laga reebo kuwo yar. Sidoo kale shaqooyin badan ayaa leh Qandaraas Guud (Gesamtarbeitsvertrag, GAV) oo ku xusan Mushaharka ugu hooseye la siin karo shaqaalaha. Dumarka iyo Ragga waxay Xaq u leeyihiin Shaqo iyo Mushahar iskumid ah. Qandaraaska shaqada qiimaha mushaharka ee ku qoran waa qiimaha guud. Mushaharka la bixiyo laakin waa inta soo harto marka la iska gooyo waajibaadka Caymiska Bulshada ee loo yaqaano (Sozialabzüge). Inta badan dadka haysto Sharciga Dalku Jooga ah ee B, Sharciga F iyo N , Sharciga gaaban ee dalku Jooga ah L ama Sharciga la isaga gudbo Xuduudaha ee G waxaa sitoos ah mushaharkooda looga gooyaa Canshuurta Dakhliga ee loo yaqaano (Quellensteuer). Lacagaha Waajibka ah ee Ceymiska Caafimaadka ma ahan kuwa qayb ka ah kuwaa laga gooyo Mushaharaadka Swiiserlaan.

## Shaqo Joojin

Shaqaalaha iyo Kan loo shaqaynaya waa inay ilaaliyaal mudada shaqada la isaga joojin karo ee ku xusan Qandaraaska Shaqada. Shaqo joojinta degdega ah waxaa la ogolyahay kaliya wax daran hadii ay dhacaan. Marwalbo waala ogolyahay inaa dalbato sababta shaqada lagaaga joojiyay oo qoraal ah. Qofka Xanuunsan, Qofka Shil galay, Hooyada Uurka leh ama Umusha ku jirto si gaar ah ayaa looga dhowray in shaqada laga istaajiyo. Shaqo joojinta aan sharciga ku dhisneyn waxaa lala tiigsan karaa Maxkamadda. Hadii Qofka Shaqaalaha ah isagu dalbado in laga joojiyo shaqada, waxay saameyn ku yeelan kartaa qiimaha lacagaha lagu caawiyo dadka shaqo la'aanta ah ee uu xaqa u lahaa.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/arbeit/rechte-und-pflichten

# Shaqo la'aanta

Dhammaan Shaqaalaha waxay ku jiraan Ceymiska Shaqo la'aanta. Qofka shaqo la'aan noqdo caadiyan waxuu helayaa in muddo cayiman ah kaalmo dhaqaale. Dadka shaqo la'aanta ah waa inay iska diiwaangeliyaan Xarumaha Gobolka ee Shaqada (RAV). Halkaas waxay ka helayaan caawinta shaqo raadinta.

## Ceymiska Shaqo la'aanta

Ceymiska Shaqo la'aanta (ALV) waa hay'ad dowli ah oo qasab ku ah dhammaan shaqaalaha inay ku jiraan. Lacagaha Ceymiskan waxaa bil walbo si toos looga jaraa mushaharka shaqaalaha. Qofka loo shaqeynayo waxuu dhiibaa nus kamid ah lacagahaas. Dadka goonidooda u shaqeysto mageli karaan Ceymiskan. Qofkii shaqo la'aan ku dhacdo, waxuu ka helayaa sanduuqa shaqo la'aanta, kaalmo ah badalkii mushaharkii uu ku shaqeyn jiray (Arbeitslosengeld). Inaad helayso ama Goorta ay kuu bilaabanayso iyo Cadadka Kaalmada shaqo la'aanta (Abeitslosengeld) ee lagu siin doono waxay ku xirantahay wax yaabo kala duwan. Tusaale ahaan, intii sano ee aad horay usoo shaqeysay ama sababta aad u noqotay shaqo la'aan.

## Qaabka loo wajaho Shaqo la'aanta

Maalin kahor inta aadan shaqada kasoo tagin ama ugu dambeyn maalinta koowaad ee shaqo la'aanta kugu dhacdo waxaad ku qasban tahay inaad iska diiwaangeliso Xafiiska Shaqada ee Gobolka (Regionales Arbeitsvermittlungszentrum, RAV). Halkaas ayaa laguugu sharixi doonaa tilaaboyinka xiga oo dhan.

## Xafiiska Shaqada ee Gobolka

Xafiiska shaqada ee gobolka (RAV) wuxuu kugu caawinayaa si deg deg ah inaad shaqo kale ku hesho. Hadii aad qaadato lacagaha kaalmada shaqo la'aanta waxaa waajib kugu ah inaad tagto Ballamaha talada ay kula yeeshaan RAV-ka. Sidoo kale RAV-ka waxuu bixiyaa koorsooyin ama shaqooyin aad kusii tababaran karto. Ka qeyb qaadashada barnaamijyada RAV-ka kuu diro qaarkood waa waajib. Sidoo kale dadka aan waligood ka shaqeynin Swiiserlaan ee shaqo raadiska ah waxay iska qori karaan RAV-ka laakin wax lacag kaalmo ah mahelayaan.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/arbeit/arbeitslosigkeit

# Aqoonsiga Shahaadada

Shahaadooyinka dibadaha kuligood kama shaqeeyaan Swiserlaan. Sababo gaar ah ayaa macquul kadhigi karo in laguu badalo shaqaadada. Shaqooyinka Qaar waa qasab in laguu aqoonsado shahaadoyinka aad ka haysato.

## Aqoonsiga

Dadka wax kuso bartay dibadda ee shahaadoyinkooda doonaya inay ku shaqeystaan ama wax kaga bartaan Swiiserlaan shuruudo ayaa jiro hadii ay soo buuxiyaan u saamaxayo in loo tixgaliyo shahaadoyinkaas. Ansixinta waxaa lagu cadeynayaa in ay isku mid yihiin shahaadoyinkii dibadda aad kala timid iyo kuwa Wadankaan laga bixiyo inay isku qalmaan. Xirfadaha qaar sida dadka ka howlgala goobaha Caafimaadka ama Macalimiinta iyo wixii lamid ah (Pflegefachleute, Lehrpersonen usw.) waa qasab in shahadadooda loo ansixiyo si ay halkan shaqooyinkooda ugu shaqaysan karaan. Aqoonsiga shahaadooyinka hadba nooca shaqada ay tahay ayay u kala duwan yihiin xarumaha ku shaqada leh ansixintooda. Aqoonsiga shahaadada ma ahan bilaash. Warbixino dheerad ah waxaad ka heli kartaa Xarumaha qaranka ee qaabilsan aqoonsiga shahaadoyinka ama La taliyaasha dhinaca waxbarashada, xirfadaha iyo wadada loo maro (Berufs-, Studien- und Laufbahnberatung).

## Caddeeynta Heerka Waxbarashada

Shahaadooyinka aan ahayn kuwa shaqooyinka Howlaha guud qasab ma ahan in laguu ogolaado inaad Swiiserlaan kaga shaqeeysato. Shaqooyinka noocan ah waxaad dalban kartaa Cadeeynta Heerka waxbarashada (Niveaubestätigung). Qaabkaan waxaa lagu muujiyaa Heerka waxbarashadii dibadda iyo Nidaamka Waxbarasahda ee Swiiserlaan. Cadeynta noocan ah waxay kaa caawin kartaa shaqo raadinta. Warbixino dheeraad ah waxaad ka heli kartaa Xarumaha qaranka ee ku shaqada leh Aqoonsiga shahaadooyinka (Nationale Kontaktstelle für Diplomanerkennung) ama La taliyaasha dhinaca waxbarashada, xirfadaha iyo wadada loo maro (Berufs-, Studien- und Laufbahnberatung).

## Waxbarashada Kuceliska ah

Dadka waaweyn ee khibrado shaqo leh balse aanan haysan shahaado Swiiserlaan laga aqoonsanyahay waxay dib u baran karo xirfadahooda booqanayana Barashada xirfadaha Aasaasiga ah ama Barashada Xirfadaha Sare. Habraacan waxuu ku xiranyahay aqoontaada, Khibrada xirfadaada aad u leedahay iyo da'daada. Si kastaba ahaatee Heerka luqadda Jarmalka ee B1/B2 ee nidaamka Yurub (Niveau B1/B2 nach GER) aad gaarsiisantahay ayaa ah shuruudaha saldhiga u ah inaad sameyso waxbarashada noocan ah.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/arbeit/diplomanerkennung